

Ka Jawaabida Faallooyinka Dadweynaha ee Xeerka La Soo Jeediyay: Shuruudaha Caafimaadka bulshada ee Ganacsiyada Seattle 03-2020

Bishii Luulyo, [Department of Finance and Administrative Services \(Waaxda Maaliyada iyo Adeegyada Maamulka](#) (FAS) waxay ku dhawaaqday qiyaas ku-meel-gaar ah oo looga baahan yahay ganacsatadu inay raacaan shuruudaha looga baahan yahay caafimaadka bulshada ee gobolka, oo ay ku mid yihiin, isticmaalida wax yalaha lagu daboolo wejiga, kala fogeynta bulshada iyo u hoggaansanaanta xadka ugu badan ay dadka ku kulmi karaan. Maaddaama kiisaska COVID-19 ay ku sii kordhayaan guud ahaan gobolka oo dhan, waaxdu waxay tallaabadan ku-meelgaarka ah ka dhigtay xeer joogto ah illaa muddada uu socdo cudurkaan. Iyada oo qayb ka ah geeddi-socodkan, Waaxda Maaliyada Iyo Adeegyada Maamulka FAS waxay talo ka raadisay dhamaan ganacsiyada sida ay uga taageeri karto hirgelinta shuruudaha qaanuunka. Faallooyinka dadweynaha waxaa lagu aqbalay qaab taleefan, emayl iyo waraaqo caadi ah illaa 5 galabnimo. Jimcaha, Ogast 28.

[Shaarciga kama dambaysta ah](#), ah, ee laga heli karo websaydhka Waaxda Maaliyada iyo adeegyada Maamulka FAS, wuxuu dhaqan galay Sebtember 9, 2020. Hoos waxaa ku xusan faallooyinka kooban oo na soo gaadhay:

- Dhammaantood faallooyinka waxay muujiyeen taageerada guud ee shuruudaha caafimaadka bulshada, kuwaasoo ay ku jiraan isticmaalida wax yalaha lagu daboolo wejiga, kala fogeynta bulshada iyo u hoggaansanaanta xadka ugu badan ay dadka ku kulmi karaan.
- Hal faallo ayaa ku dooday in Waaxda FAS ay tahay inay qaado tallaabooyin xoog badan oo ka dhan ah ganacsiyada aan u hoggaansamin sharcigaan. Afar faallooyin kale, ayaa si kastaba ha noqotee, ku dooday in ganacsatadu aysan masuul ka noqon karin fulinta shuruudahaas gabi ahaanba; taas badalkeedna, xafiisyada dawladu waa inay mas'uul ka noqdaan fulinta sharcigaas.
-

***Jawaab:** "Sharcigaan wuxuu ku saabsan yahay caafimaadka bulshada iyo ilaalinta caafimaadka iyo Amniga bulshadayadeena," ayuu yiri Calvin W. Goings, Agaasimaha Waaxda Maaliyada iyo Adeegyada Maamulka. "Waxaan u aragnaa ganacsatada Seattle inay yihiin shuraako shaqadan waxaan diirada saarnay oo aan sii joogitayn doonnaa wacyigalinta iyo waxbarashada si loo hubiyo in macaamiisha iyo shaqaaluhu ay nabad iyo caafimaad qabaan"*

Iyada oo qayb ka mid tahay dadaalkeeda waxbarashadeed iyo wacyigalinta, waaxdu waxay u qaybisay waraaqo hal-bog ah oo ku qoran toddobo luqadood ganacsiyada, , [Waxay furtay bogaan e](#) iyo waxayna la shaqeysay Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha, olole e-mayl si ay gacan uga geysato xoojinta shuruudaha ganacsi ee dowladdu u igmatay tasoo loo abuuray inay ka caawiso ilaalinta shaqaalaha iyo macaamiisha ganacsiga.

Ganacsiyada leh dambiyada soo noqnoqda iyo / ama kuwa anshax xumada leh waxay wajahayaan in la joojiyo ruqsada ganacsi ee Magaalada Seattle waxaana lagu soo oogi karaa dambi ciqaabtiisa ugu badnaan gaaraya 364 maalmood oo xarig ah iyo \$ 5,000 oo ganaax ah.

Qof kasta oo ka walwalsan dhabar jab ku yimaado Meheradiisa ama shaqaalihisa

markii uu dhaqan galinaayo siyaasadahaan waxaa lagu dhiirrigelinayaa inuu booqdo hagitaanka ay soo saartay Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada [Centers for Disease Control and Prevention](#) (CDC) ee cinwaankeedu yahay "Yareenta Rabshadaha Goobta Shaqada ee La Xiriira Xeerarka Ka-hortagga COVID-19 ee Tafaariiqda iyo Adeegyada Ganacsi." [Limiting Workplace Violence Associated with COVID-19 Prevention Policies in Retail and Services Businesses.](#)"

- Mid ka mid ah faallooyinka nasoo gaarya ayaa weydiistay hagitaan dheeraad oo ay ganacsiyada tafaariiqleyda oo ku saabsan sida loola macaamilayo macaamiisha sheeganaya in la ga dhaafay shuruudaha ilaalinta daboolista wejiga sababo caafimaad awgood.

Jawaab: Ganacsatadu waa inaysan weydiisan caddeyn ama faahfaahin haddii macaamilku yiraahdo waan ka reebbanahay daboolista wajiga ee looga baahnaa sababo caafimaad awgood. Ganacsiyadu waa inay bixiyaan ikhtiyaarro adeegyo beddel kale leh, sida gaarsiinta alaabta asagoo macaamiil ku taaganyahay waddada dhinaceeda ama u oggolaatid qofka inuu xirto gaashaan buuxa oo wajiga dabooli karo, si loo ilaaliyo amaanka shaqaalaha iyo macaamiisha.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ka caawinaya ganacsiyada sidii loo fulin lahaa shuruudahan, oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan ka-dhaafitaanka caafimaad ee looga baahan yahay daboolista wajiga, fadlan booqo bogga FAS ee Shuruudaha Ganacsiga iyo Makhaayadaha Inta lagu gudajiro COVID-19 iyo Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington Dharka afka lagu daboosho iyo Maaskarada. looga baahan yahay, fadlan booqo [Bogga FAS ee Shuruudaha Ganacsiga iyo Makhaayadaha Inta lagu jiro COVID-19](#) iyo [Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington Dharka Maqaarka ee Wejiga iyo Maaskarada Su'aalaha la Weydiiyo.](#)